

# Tallaalka hargabka waxaa Alberta laga helayaa todobaadka soo socda

Oktoobar 13, 2022 [Weydiimaha Saxaafada](#)

Laga bilaabo Oktoobar 17, dadka reer Alberta ee da'doodu tahay lix bilood iyo wixii ka sii weyn waa ay qaadan karaan tallaalkooda hargabka.

Dadka reer Alberta ee da'doodu ka weyntahay 65 sanno waxay xaq u leeyihiin in ay qaataan tallaalka hargabka oo xaddi sare ah, halka kuwa da'doodu u dhexayso lix bilood ilaa 64 sannadoodna ay heli doonaan xaddiga caadiga ah. Labaduba waxay dadkeenna ka difaacayaan xanuunada caadiga ah ee fayraska hargabka.

## Sii qabso ballantaada tallaalka

Laga bilaabo Oktoobar 17, tallaalada hargabka waxaa laga heli doonaa farmashiyada ka qaybqaadanaya, qaar kamid ah goobaha caafimaadka bulshada iyo goobaha la xushay ee AHS.

Ballamaha tallaalada waxaa laga heli doonaa Nidaamka Qabsashada Ballanta Tallaalka ee Alberta ee barta [bookvaccine.alberta.ca](#) ama adiga oo ka wacaya Health Link lambarka 811.

Farmashiyada qaar ayaa sidoo kale soo dhaweynaya in qaab bilaa ballan ah looga doonto. Haddii farmashiga deegaankaagu uusan kujirin nidaamka qabsashada ballanta, si toos ah ula xiriir ama bookho [bluecross.ca](#) si aad u hesho farmashiga kuugu dhow.

## Meesha aad iska tallaalayso

Laga bilaabo Oktoobar 17, tallaalka hargabka waxaa si bilaash ah lagu siin doonaa:

- Dadka reer Alberta ee shan sanno jirrada ah ama kasii weyn ayada oo laga siinayo farmashiyada iyo qaar kamid ah goobaha caafimaadka bulshada.
- Dadka reer Alberta ee lix bilood jirrada ah ama kasii weyn ayada oo laga siinayo qaar kamid ah goobaha caafimaadka bulshada.

Adeegyada Caafimaadka ee Alberta waxay tallaalka kusiin doontaa goobaheeda caafimaadka bulshada:

- Caruurta da'doodu ka yartahay shanta sanno iyo xubnaha kale ee qoyskooda.
- Shakhsiyadka aan lahayn lambarka caafimaadka ee gobolka.
- Shakhsiyadka ku nool bulshada dhexdeeda halkaas oo aysan kajirin bixiyeyaal tallaalka daryeelka caafimaad oo kale.

## **Xaqiiqooyin kooban**

- Dowladda Alberta waxay dalbatay 1.9 milyan oo tallaalka hargabka ah si ay gacan uga gaysato ilaalinta caafimaadka Alberta.
- Tirooyinka xilli-laha ah ee hargabka ee Alberta ee 2021-22:
  - Waxaa jiray 2,906 xaaladood oo shaybaar lagu xaqiijiay oo hargab ah iyo 14 dhimasho oo hargabku sababay.
  - Dadka tallaalan ee gobolku wuxuu ahaa 27 boqolkiiba.
  - Ku dhawaad 82 boqolkiiba dadka ku nool goobaha daryeelka muddada dheer ah waa la tallaalay.
  - Ku dhawaad 52 boqolkiiba caruurta da'doodu u dhexayso lixda bilood ilaa 23ka bilood waxay qaateen ugu yaraan hal mar tallaalka hargabka.
  - Ku dhawaad 65 boqolkiiba dadka waaweyn ee 65 sanno jirrada ah ama kasii weyn ayaa la tallaalay.
  - Farmashiileyaasha ayaa mas'uul ka ahaa maamulista 75 boqolkiiba dhammaan tallaalada hargabka.

## **Macluumaadka la xidhiidha**

- [Qabso Ballantaada Tallaalka ee Alberta](#) (hargabka iyo COVID-19)
- [Ku saabsan hargabka](#)